

Marka ardaydu aanay awoodin inay dugsiga tagaan 10 maalmood ama ka badan: Macluumaad loogu talagalay Qoysaska

Waxaan fahamsanahay in duruufaha nolol-shida safarka, jirrada, ama xaaladaha degdegga ah ee qoyska- ay mararka qaarkood ku adkeyn karaan ardayda inay dhigtaan dugsiga muddo dheer. Si looga caawiyo maaraynta xaaladahan, ODE waxay u bixisay kheyraadkan agabkan si ay u bayaamiso Oregon's **Siyaasadda Maqnaanshaha 10-maalmood**. Kheyraadkani waxa uu qoysaska ka caawin karaa in ay maareeyaan xaaladahan oo uu sharraxo siyaasadda maqnaanshaha 10-ka maalmood ee Oregon iyo sida maqnaanshaha la dheereeyey u saameeyaan diiwaangelinta dugsiga.

Dulmar Guud:

Kheyraadkan, waxaad ka heli doontaa macluumaad kaa caawiya:

1. Fahamka siyaasadda maqnaanshaha 10 maalmood.
2. Inaad la xidhiidho dugsiga.
3. Sahamiso ikhtiyaarrada waxbarashada isaga oo ardaygaagu ka maqan dugsiga

Waa maxay Siyaasadda Maqnaanshaha 10-maalmood 10-Day?

Oregon, haddii ardaygu uu ka maqan yahay **dugsiga 10 maalmood oo isku xigta** iyada oo aanu dhigan wax tacliin ah (ha ahaato qof ahaan ama fogaan arag), sharciga gobolku wuxuu ka rabaa dugsiyada inay **ka saaraan** ardayga diiwaanka. Maqnaanshaha la dheereeyay, horay loo sii qorsheeyay, ama la og yahay, ka saaridda diiwaanku waxay dhacaysaa marka dugsiga la ogeysiiyo maqnaanshaha (tusaale, qoysku wuxuu dalka ka maqnaan doonaan 3 toddobaad). Tani waxay hubinaysaa in dugsiyadu si sax ah u soo sheegaan diiwaangelinta, maadaama ay si toos ah u saamaynayso sida dugsiyadu u helaan maalgelinta gobolka.

Waxaa muhiim ah in la ogaado in siyaasaddani ay tahay *aysan ahayn* mid loogu talagalay in lagu ciqaabo. Si fudud waa shuruud looga baahan yahay dugsiyadu inay u hoggaansamaan xeerarka maalgelinta gobolka. Siyaasaddu **maaha** mid ka tarjumaysa ka go'anaanshaha ardayga ee waxbarashada ama duruufaha qoyska.

Maxay tahay inaad qabato?

1. **La xidhiidh dugsigaaga:** Haddii aad ogtahay in ilmahaagu maqnaanayo muddo dheer, la xiriir dugsigaaga isla markaaba. Dugsigu wuxuu kaala shaqayn karaa in la go'aamiyo qorshaha ugu fiican ee ardaygaagu lagu ilaalinayo waxbarashadiisa.
2. **Baadh fursadaha jira:** Wax ka weydii dugsigaaga **waxbarashada fogaan aragga ah** ama **mashaariicaha waxbarasho ee kale la sameeyay** si loo hubiyo in ardaygaagu ku sii jiro waxbarashada intuu maqan yahay.
3. **Qorshee dibu-diiwaangelinta:** Haddii ay tahay in ardaygaagu aanu diiwaan gashanayn sababo la xidhiidha siyaasadda ka-tagidda 10-maalmood, dibu diiwaangeli marka ay soo laabtaan caadiyan waa hab fudud. Dugsigu wuxuu kaa caawinayaa inuu kugu hogo tallaabooyinkan.

Sidee bay u Shaqaysaa Siyaasaddani?

- **Ka-saaridda Diiwaanka:** Ka dib 10 maalmood oo isku xigta oo maqnaansho ah oo aanay jirin waxbarasho aqooneed oo socota, dugsiyadu waa inay ardayga ka saaraan diiwaanka.
- **Re-enrollment:** Marka ardaygu diyaar u yahay inuu ku soo laabto dugsiga, dibu diiwaangelinta inta badan waa hawl degdeg ah oo toos ah. La xidhiidh dugsiga si uu ugu fududeeyo ardayga ku soo laabashada jadwalkooda caadiga ah.

Ikhtiyaarrada Maqnaanshaha La Dheereeyay

Haddii ardaygaagu uu maqnaan doono muddo dheer, laakiin aad heli karto internet ama agabyo kale oo isgaarsiineed, waxaa suurto ah in ardaydu ay waxbaran karaan inta ay maqan yihiin. Degmooyinka qaar ayaa bixiya ikhtiyaarro **waxbarashada fogaan aragga/masaafada fog**, taas oo u oggolaanaya ardayda in ay sii wadaan ka qaybgelidda waxbarashadooda qaab fogaan arag ah. Tani waxay ka caawin kartaa aqoonyahankaaga inuu ka diiwaangashanaado oo uu dhigto waxbarashada maalinlaha ah, xitaa isaga oo aan qof ahaan joogin fasalka.

Degmo kastaa siyaabo kala duwan ayay wax uga qabataa xaaladahan, markaa waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad la xidhiidho dugsigaaga sida ugu dhakhsaha badan si aad ugala hadasho fursadaha jira. Dugsigaagu waxa laga yaabaa inuu bixiyo:

- **Aseemano onlayn ah ama ka-qaybqaadashada onlaynka ah** iyada oo la isticmaalayo balaatfoomyo waxbarasho oo kala duwan.
- **Shaqo/mashaariic dugsiga** taas oo si madax banaan loo dhammaystiri karo, iyada oo waliba la ilaalinayo wada-shaqaynta muhiimka ah ee macallinka iyo ardaygaaga ee maalin kasta. Wada-shaqaynta Muhiimka ah ayaa ah *siyaabaha lagu muujiyo in ardaygu si firfircoon uga qaybqaadanayo waxbarashada*, xitaa haddii aysan joogin fasalka. Waa kuwan tusaalooyin, waxaana laga yaabaa inay jiraan siyaabo kale oo la mid ah kuwan oo lagu muujin karo sida ardaydu ugu hawlan yihiin shaqada dugsiga:
 - **K-qaybqaadashada fasalka muuqaalka ah:** Ku biirista iyo ka-qaybqaadashada si firfircoon fasalka onlaynka ah ama casharka fogaan aragga ah.
 - **Xiriirka laba-geesoodka ah ee macalinka:** La samaynta wada sheekaysi laba geesood ah oo lala yeesho macalinka iyada oo la isticmaalayo wada-sheekaysi, farriin qoraal ah, app-ka isgaarsiinta, ama iimaylka.
 - **Wicitaannada telefoonka:** La samaynta wicitaanno taleefoon waqti dheer oo lala yeesho macalinka ama shaqaalaha waxbarashada. Ardayda da'da yar, tani waxa ku jiri kara taleefoono dhex mara macalinka iyo waalidka ama masuulka.

Ku jiritaankaaga aqoon ahaaneed ee hababkani, aqoonyahankaagu wuxuu sii wadan karaa waxbarashadiisa wuxuuna ku sii jiri karaa dugsigooda inta lagu jiro maqnaanshaha la dheereeyay. Si kastaba ha ahaatee, haddii ka qaybqaadashadu aysan suurto ahayn, dugsigu waa inuu raacaa siyaasadda ka-tagidda gobolka ee 10-ka maalmood ah, iyo ardaygaagu wuxuu u baahan doonaa in dib loo diiwaan geliyo markay soo laabtaan.

Taageeridda Ardayda Xilliga Maqnaanshaha

Waxaanu fahamsanahay in maqnaanshaha, ha ahaato mid la qorsheeyay ama mid lama filaan ah, ay u keeni karto caqabado qoysaska. Muhiimadayadu waa in aanu hubinno in arday kastaa uu helo fursad uu ku sii wato waxbarashadiisa, xitaa marka aysan qof ahaan joogin dugsiga. The **Siyaasadda Maqnaanshaha 10-maalmood** waa shuruud gobol, waxaana naga go'an inaanu kula shaqayno si aad u hesho xalal taageera waxbarashada ardaygaaga.

Fadlan ha ka waaban inaad kala xidhiidho dugsiga deegaankaaga ama xafiiska degmada wixii su'aalo ah ama walaac ah oo ku saabsan imaanshaha ardaygaaga ama siyaasadda maqnaanshaha 10-ka maalmood ee dugsiga. Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawinno si kasta oo aanu awoodno.

